

Macmiilka xerada qaxootiga: Waa warbixin ku saabsan gudashada soonka bisha Ramadaan iyo xaaladda haatan lagu jiro ee feyruska korona

Waa inaad fixgelin siiso xaaladdan taagan ee feyruska korona, inta lagu guda jiro gudashada soonka bisha Ramadaan.

Qof walbaa falkiisa u gaarka ah ee uu samaynaayo ayaa saamayn weyn ku yeelan kara faafista cudurka. Qof walba waxaa saaran waajibka ah in uu wax u qabto si mas'uuliyad leh. Waa in aad ku dadaashaa sidii uusan cudurku ugu dhex faafi lahayn xerada qaxootiga gudaheeda iyo bannaankeedaba.

Qaababka hoos ku xusan ayaa caawimaad ka gaysanaya sidii looga hortagi lahaa faafista feyruska, inta lagu guda jiro gudashada soonka ee bisha Ramadaan:

1. Waxaad iska ilaalisaa goobaha guud ee la isugu yimaado, dadka kooxda ah iyo isu-imaatinka guud.
2. Iska ilaali xitaa munaasabadaha gaarka ah ee dadka joogaa tiradoodu ay yar tahay iyo la kulanka dadka kale ee aan ahayn ehelkaaga. Iska yaree la xiriirka dadka kale.
3. Iska ilaali arrimaha aan lagamamaarmaanka ahayn sida socodka, safarka iyo inaad tagto dadka kale guryahooda. Haddii aad ku nooshahay xerada qaxootiga bannaankeeda, qofna gurigaaga ha ku martiqaadin.
4. Ka taxaddar nadaafadda caafimaadka wanaagsan ee gacmo dhiqista iyo qaabka loo qufacaayo. Gacmaha mar walba si taxaddar leh ugu dhaq biyo iyo saabuun. Markaad qufacayso, waxaad ku qufacdaa cududdaada, adigoo suxulka soo laabaaya.
5. Ka fogow dadka kale, waxaadna u jirsataa masaafo dhan 2 mitr. Qofna gacanta ha ka salaamin, habna ha siinin.
6. Waxaad isticmaashaa afshareerka, sida talo ahaantaba loogu soo jeediyay.
7. Ha soconin ama dano soo dhamaysi ha u tagin adigoo ay astaamihii xanuunku ku hayaan, xerada gudaheeda ama bannaanka xerada iyo gurigaagaba.
8. Haddii aad wax astaamaha cudurka ah dareento ama isku aragto, amaba aad u nuglaatay feyruska korona (aad la kulantay qof qaba cudurka), sida ugu dhakhsaha badan ugu soo gudbi shaqaalaha xerada qaxootiga.
9. Waxaad u hoggaansantaa hagista iyo tilmaanbixinta ay soo jeedinayaan shaqaalaha xerada qaxootiga iyo hawlawadeennada kale ee dowladda.

Hagista ku saabsan qaabka loo soomaayo bisha Ramadaan, waxaad ka heli kartaa bogga Ururka Islaamka ee Finland: rabita.fi.

Dhammaan macaamiisha xerada qaxootiga waxaan ka codsanaynaa wadashaqeyn, sabar, dulqaad iyo degganaan wanaagsan. Wixii warbixin dheraad ah ee aad u baahato waxaad ka heleysaa shaqaalaha xerada qaxootiga.